

Af-soomaali Dugsiga Sare Fasalka 4^{aad}

(Sanad Dugsiyeedka 2020-2021)

Su,aalo Iyo Jawaabo: Cutubka 1^{aad} (Qoraal Sharaxeed)

• Jwb: Waxqabadka 4aad

1.	Amakaag, Ashqaraar, ama Cajiib	Yaab
2.	Cagaha wax ka day, Carar ama Firxasho	Yaac
3.	Kashiito	Caanaqub
4.	Tukulush	Dabagaale ama Uunreys
5.	Bahal yar oo daba galaha u eg	Saangur
6.	Dameerka yar	Qayl
7.	Dameerka weyn ee labka ah	Muun
8.	Dameerka weyn ee dhediga ah	Muuno
9.	Idaha yar yar ee ka kooban lab iyo dhedig	Naylo
10.	Idaha koray ee naylo dhaafay lax iyo wanno	Baraar

• Jwb: Waxqabadka 7aad

1.	Fanasho	Degasho
2.	Buubaal	Hayin
3.	Horweyn	Irmaan
4.	Galoof	Xaas
5.	Har	Cirid
6.	Kul	Qabow
7.	Lax	Wan
8.	Caro	Farxad
9.	Gaari	Baali
10.	Dhurow	Dhimo

• Jwb: Waxqabadka 8aad

1.	Saymo	Roob
2.	Aar	Libaaxa labka ah
3.	Aas	Xawaal
4.	Aaran	Barwaaqo
5.	Addin	Bowdo
6.	Adduun	Ifka lagu noolyahay
7.	Af	Luqad
8.	Afti	Qaynuun
9.	Agool	Qolaofyo cad oo madaxa gala
10.	Alkun	Nin gabar udoonan tahay

Jwb: Waxqabadka 9aad

1.	Duhur	Wirwir
2.	Su,aal	Weydiin
3.	Shay	Wax
4.	Rafiiq	Wehel
5.	Tacliin	Waxbarasho
6.	Qaanuun	Xeer
7.	Naf	Xaw
8.	Qiyam	Xeer daahsoon

- 1. Kee baa gardaran nin beeraaley ah iyo nin xoolaaley ah iyaga oo isku haysta beertey aye xoolihiisu iga daaqeen iyo ma anigaa iri beerta soo daaqa ?**

Jwb: Waxaa gardaran ninka xoolaha iskaleh waayo waxay kala yihiin socoto iyo masocoto xooluhu waa socoto lkn beerta waa loo yimid sidaas darteed Waxaa gardaran ninka xoolaha iska leh.

- 2. Sidee dhaqanka soomaalida ugu tarjumayaa waxa dhex maray Xirsi iyo Oday G eedoow ?**

Jwb: Waxay ka tarjumeysaa in soomaalidu ay uqayb samaan kuwa xoolaaley ah iyo kuwa beeraaley ah sidaas darteed beeraleydu waxay leeyihiin dhaqama kala duwan waayo beeraha qaar Waxaa lagu falaa dibiyo kuwa kalena Waxaa lagu falaa yaambo Sidoo kale dhaqamada beeraha Waxaa kamid ah in beeraha qaar ay waraab ka helaan wabiyada kuwa kalena ay sugaan xilliyada roobka iyo kuwo lagu waraabiyo ceel biyood.

- 3. Sidee buu ugu faa,iiday Xirsi safarkii uu ku tagay tuulada oday geedoow sharax ka bixi ?**

Jwb: Xirsi Safarkii uu ku tagay tuulada oday geedoow Waxaa uu kasoo faa,iday in uu soo qaatay cashiro ku saabsan sida loo tacbado beeraha sidoo kalena Waxaa la soo siiyay agabka beeraha lagu falo.

- 4. Sharax ka bixi sida deegaan kaaga looga tacbado beeraha adiga oo is barbardhigaya habkii loogu sharaxay Xirsi ?**

Jwb: Deegaankeena beeraha Waxaa loo tacbadaa sida tan marka hore waa la cabiraa dhulka, waana lageed qaadaa sidoo kale waa caragediyaa kadib jibaal jibaal ayaa loo sameeyaa kadib Waxaa dhulka beerta lagu duugaa abuurka.

- 5. Dhaqaalaha Soomaaliya kee baa u wanaagsan beerashada iyo xoolo dhaqashada ? Sharax ka bixi adiga oo is barbardhigaya labadooda ?**

Jwb: Dhaqaalaha soomaaliya Waxaa u wanaagsan xoolo dhaqashada waayo xoolaha Soomaaliya badanaa waxaa la dhoofiyaa dibadaha dhaqaala badan ayaa laga helaa, laakiin hadii aan is barbardhigo beerashada iyo xoolo dhaqashada qoys walba oo soomaaliyeed Waxaa uu dhaqdaa xoollo xitaa haddii uu beeraaleey yahay, laakiin inta beeraha falata aad bay uyar yihiin.

- 6. Goboladee ugu badan soomaaliya tacbashada beeraha ? maxaase ugu wacan ?**

Jwb: Gobolada ugu badan tacbashada beeraha Waxaa u badan labada shabeele (Shabeelaha Hoose iyo Shabeelaha Dhexe) waxaana ugu wacan wabiyada mara dalkeena.

- 7. Xagee ugu badan soomaaliya ee laga soo saaraa bardhada ?**

Jwb: Bardhada Waxaa laga soo saaraa gobolka Hiiraan gaar ahaan magaalada Baladweyne.

- 8. Sidee ugu fiican ee beer looga tacban karaa ,meelaha aan wabiyada marin ?**

Jwb: Meelaha aan wabiyada marin beeraha waxaa looga tacban karaa in ceel laga qodo kadibna matoor lasaaro sidaasna lagu waraabiyo ama xilliya roobaadka la sugo.

- 9. Muxuu yahay Dallaga ugu badan ee soomaaliya laga soo saaro ? xaggese laga soo saaraa ?**

Jwb: Dallaga ugu badan ee Soomaaliya waxaa kamid ah Galleyda, Digirta Sisinta i.w.m waxaana laga soo saaraa labada Shabeelle (Shabeelaha Hoose iyo Shabeelaha Dhexe)

- 10.Waa maxay Iniin ama Shinni ?**

Jwb: Iniin ama Shinni Waxaa layiraahdaa miraha beerta lagu abuuro.

11. Waxqabadka 4aad		
1.	Naxash	Hantool
2.	Kala did ama ordid	Hanfariir
3.	Dabeyl kulul oo wax leefta oo ka timaadda cadceeda iyo walxaha macdanta	Hanfi
4.	Asaay, Hengel ama Hengesh waa dhar dumar xirto marka laga dhinto	Hangal
5.	Xididka dhiigga jirka ka soo noqda oo wadnaha keena	Haniye
6.	Weelka wax lagu cuno ama lagu cabo inta ku harta	Hanbo
7.	Maareyn suuban oo qofka hankiisa ku fadhida	Hannaan
8.	Codka ay sameeyaan hillaaca iyo onkodka wada socda	Hanqar
9.	Oogada dadka ee qaaxada ka sareysa laga bilaabo karaysiimaha iyo madaxa	Hanqal
10.	Daloolka udhaxeeya dhuunta, sanko iyo afka ama sanqada	Hanqalaal

12. Waxqabadka 5aad		
1	Kuu sheekeeye kaa sheekeeye	Lalama sheekeysto
2	La hel lahel	La waa baa xigta
3	La jiifiyaana banaan	La joojiyaana banaan
4	Laafyo aadan udhalan	Lix saamood ma dhaafto
5	Laanta toosi intey	Curdan tahay ama yar tahay
6	Laba aan isku waramin	Ma walaalowdo
7	Laba biyood oo hoosta iska haraatiyay	Iyagaa iska kaa og
8	Laba biyood kulul	Isma qaboojiyaan

13. Waxqabadka 7aad		
1.	Raaxo	Rafaad
2.	Shilis	Caato
3.	Riman	Dhalay
4.	Irmaan	Guran
5.	Hebed	Tood ama Toojo
6.	Guban	Oogo
7.	Dhimo	Nooloow
8.	Burcad	Baqbeeno
9.	Ugub	Curad
10.	Kadin	Reysin

14. Waxqabadka 8aad		
1.	Maag	Daandaansi, gardarro, maagid
2.	Maal	Hanti, Malax iyo caana soo lisid
3.	Maamuus	Xushmad, Xurmad iyo wanaag
4.	Maan	Awoodda garashada ee qof leeyahay
5.	Maar	Macdan jilicsan oo alaabooyinka laga sameeyo
6.	Maax	Biyo badan oo ceel ku jira oo dhulka hoostiisa kasoo baxay
7.	Mac	Dhadhan wanaagsan, Neef aan caata aheyn baruurna laheyn ama dhunkasho
8.	Maqal	Dixri yar yar digada xoolaha ka dhasha ama shanqar
9.	Mase	Erey labada dhinac lagu xiriiriyo Tus: (ma midigtaa mase bidixda)
10.	Mowjad	Hirarka badda

1. Waa maxay Maanso ?

Jwb: Maansadu waa hal-abuur, kaas oo bulshada qaar uun ka yimaada. Maansadu waxay leedahay habdhac iyo qaafiyad iyada u gaar ah.

2. Immisa qaybood ayey u qaybsantaa Maansada ?

Jwb: Maansadu waxay uqaybsantaa sida tan **Gabay, Geeraar, Jiifto, Mansafo, Buraanbur, Guurow, Shirib, Saar, Salsal** iyo **Waglo**.

3. Maansada Soomaalidu maxa ay ka kooban tahay ?

Jwb: Maansada soomaalida Waxa ay ka kooban tahay meerisyo, isku qaafiyad ah si ay usameyso cod habdhac leh.

4. Maxaa loogu yeeraa Maansada Soomaalida ?

Jwb: Maansada Soomaalida Waxaa loogu yeeraa qaafiyadeeda oo ah xarafka ay ku socoto sida: **Maansooyinka Miinleeyda, Deeleeeyda iyo Siinleeyda** i.w.m

5. Waa maxay qaafiyad ?

Jwb: Qaafiyaddu waxa ay kamid tahay tiirarka dhismaha maansada soomaalida. Sidoo kale qaafiyadu waa adeegsiga iyo soo celcelinta xaraf isku mid ah.

6. Waa maxay Jiifto ?

Jwb: Jiiftadu waxay kaga duwantahay mansooyiinka kale gaabida meeriska iyo habdhaceeda oo kooban.

7. Jiiftada maxa uu ka kooban yahay ? Tusaalana ka bixi

Jwb: Jiiftadu halkii meerisba waxa uu ka kooban yahay hal xaraf qaafiyadeed.

Tusaale: Qalinkaa wax suureeya
Kugu sima halkaad doonto

8. Waa maxay gabay ?

Jwb: Gabaygu waa hal-abuurkii ugu horeeyay ee ay suugaanyahaniintu tirin jireen

9. Gabayga maxaa uu ka kooban yahay ? Tusaalana ka bixi

Jwb: Gabaygu halkii meerisba waxa uu ka kooban yahay laba xaraf qaafiyadeed.

Tusaale: **Gob** kolkuu dareenkii noqdee **gegi** banaan seexdo

Jwb: Gabaygu halkii meerisba waxa uu ka kooban yahay saddex xaraf qaafiyadeed.

Tusaale: **Jannaa** udug leh, **Jiic** baa godgodan, **Jahannamaa** qiiq leh.

10. Maansada Soomaalida meeriskee ugu dheer ?

Jwb: Maansada Soomaalida waxa ugu meeris dheer **gabayga, guurowga** iyo **buraanburka**.

11. Waa maxay Salsalka iyo Hebduhu ? Tusaalana ka bixi

Jwb: Salsalka waa heesta loo qaado marka **oorta geela** rarayo sidoo kale **Kebduhu** waa dhambasha la saaro **oorta geela**

Tusaale: **Koroonkor** cuni meyno, **Kariba** maynee, **Karuur** geel mala haayaa.

12. Waa maxay Duraha ?

Jwb: Duraha waa erey lagu suubistay xarafka qaafiyadda ah ee gabayga ku socdo.

13. Waa maxay Alan ?

Jwb: Alanku waa xubnaha dhawaaqa yar yar ee meerisku ka kooban yahay. halka alan Waxaa raaci kara hal ama laba shibane. **Alanku** waxa uu ka unkumaa shaqal gaaban oo lagu magacaabo **Alan gaab** sidoo kale **Alanku** waxa uu ka unkumaa shaqal dheer oo lagu magacaabo **Alan dheer**.

14.Immisa ayuu ka koban yahay Tirada Alanada ee Gabayga, Jiiftada iyo Buraanburka ?

Jwb: Gabayga waxa uu ka kooban yahaylabaatan Alan.

Jiiftada waxa uu ka kooban yahaySagaal Alan.

Gabayga waxa uu ka kooban yahaytoban iyo sideed Alan.

15.Waa maxay Dhambalan ?

Jwb: Dhmbalanku waa furfuran ku yimid gudaha lugaha meeriska ee alanku bedelaya jaadkiisa iyo tiradiisa.

16. Waxqabadka 6aad			
1.	Dhowrto	Dhuuni	
2.	Afgembi	Afti	
3.	Kala jaan	Isku mid	
4.	Kabbo	Qurquri	
5.	Kabti	Kaadsii	
6.	Xawli	Xusli	
7.	Kalsooni	Qoonsi	
8.	Kaad	Qabow	
9.	Huuri	Haawi	
10.	Lis	Gaaxi	

17. Waxqabadka 7aad		
1.	Caad	Daruur ama xuub cad oo isha qeybteeda madow fuusha
2.	Caal	Waa cudur lo,da iyo idaha calooshooda ku dhaca ee la yiraahdo gooryaan
3.	Caar	Waa midab baraashirix ah oo lo,da ariga iyo fardahu yeeshaan
4.	Cabban	Wax adkeysii yar leh ama nuglaansho
5.	Cadar	Xilli qabow oo aan roob da,ayn ama wax carfayo tusaale barfuun
6.	Cadcad	Waxaro yar yar oo aan wali ababin
7.	Calaacal	Hadal beerlaxawsi leh ama Calaacasha gacanta
8.	Caddaan	Midabka Cad ama daacadnimo ama run
9.	Cagaar	Mida u eg kan caleenta iyo cawska marka doog yihiin
10.	Cagaf	Cagta geela

1. Maxay tahay dulucda sheekada Mudnaan Badan?

Jwb: Dulucda sheekadu waxay tahay in **Haweenka** soomaaliyeed ay yihiin hormuudka **Ragga**, sababtoo ah **Haweenku** waa macalinka ugu horeeya ee dadka wax bara sida: afka iyo dhaqanka toosan, waxa ay doorweyn ku leeyihiin halganka ay umaddi uga jirto hanasha rabitaankeeda toosan, waxaase ta aka sii weyn bal aan eegno hooyada marxalada ay marto si ay adiga kuu soo saarto waxa aad arkeysaa Sheekh, Aqoonyahan, Macalin, Wasiir, Madaxweyne, Ciyaaryahan, Abwaan, Generaal, Safiir, Ganacsade, i.w.m dadkaas qiimaha badan Waxaa soo wada barbaariyay waa dumar.

2. Maxaa ka faa,ideysatay sheekada adiga qof ahaan?

Jwb: Sheekada waxaan ka faa,iday in inta badan raga haweenka ay liidaan laakin Haween la,aantii waxba mahagaagi karaan waayo maalinta inanta warka barato ayey bilawdaa gargaarkeeda, hana qaadkeeda labaad nadaafadda reerka ayey kala qayb qaadataa sidoo kale Waxaa la yiraahdaa kaalin wacan ayay kaga jirtaa waxbarashada oo la ogaaday in haweenka waxbarashadooda ka waxtar badan tahay tan raga waa tii horay loo yiri “ **Haween wax baratay waa qoys wax bartay**“ .

3. Jilahee ayaad is leedahay qaybta ugu weyn ayuu ku lahaa sheekada?

Jwb: Jilaha qaybta ugu weyn ku lahaa sheekada waxa uu ahaa oday guure sababtoo ah waxa uu keenay taladii aheyd in wiilka socdaal loo guuriyo gabar socdaa waxa uu helay gabar aad ufiican oo noloshiisa wax ka badashay.

4. Meeqa jile ayaa sheekada ka muuqda, maxaysa kala yihiin kaalmahooda?

Jwb:

Jilaha 1aad waxa uu ahaa Wiilka lagu magacaabo **Socdaal** kaalintiisu waxa ay aheyd in uu jilo wiil aan fiicneen.

Jilaha 2aad waxa ay aheyd inanta lagu magacaabo **Dhool** oo aheyd inantii badashay mustaqbalka Socdaal oo marwadiisa noqotay

Jilaha 3aad waxa uu ahaa **Oday Guure** oo uu ahaa odaygii ku talaiyay in Socdaal loo guuriyo Gabar wanaagsan.

Jilaha 4aad waxa uu ahaa **Adeer Guuroow** oo ahaa adeerkii tusaalaha ka bixiyay dhanka diinta oo ku saabsaneed haweenka.

5. Waxqabadka 8aad		
1.	Waa cadka gaduudan ama madow ee ilkaha ku fadhiyaan	Cirid
2.	Meel fog ku libiidhsan, meel ishu gaareyn	Conqol
3.	Talo xun ayaa la siiyay, dhibaataa heysata	Codkiisuu ka dheereeyay
4.	Waa dabeysha dhulka kolka roobabka curanayaan ee ay kaliilaha tahay	Cirrin ciir
5.	Hilibka reerka wax qashay siiyo reeraha kale	Ciyi
6.	Rucubka sare ee baarka geedka duurka	Cobol
7.	Waa qanjirada ku yaal xaga sare meesha labada hungiri ku kulmaan ee dhawaaqa iyo jabaqda abuurta	Codcuriye
8.	Arinta wuu ku degdegay, wax kale ayuu isu qaatay	Cirkaa looga dhawaaqay
9.	Waa kolka laagta ama dhudhubtu yeelato	Crrimis
10.	Waa xedid mergi ah oo hunguriga labada dhinac ka mara	Coobbe

6. Waxqabadka 9aad		
1.	Gibil	Layli
2.	Gun	Gogol
3.	Dululaati	Baar
4.	Daryeel	Maleeg
5.	Juuq	Jaaq
6.	Caad	Baylah
7.	Murti	Sir
8.	Axan	Agas
9.	Agabar	Ciq
10.	Shalay	Maanta

1. Waxqabadka 4aad		
1.	Addoon, qof la leeyahay, qof allah ku xeran	Bidde
2.	Birbir, walax meel fog looga jeedo	Bidhaan
3.	Weel yar oo haruub ah oo caanaha lagu cabbo, doobi	Bidhe
4.	Foolka bartankiisa, wajiga bartankiisa	Biriir
5.	Dab daarid, hurin, shidis, dabka noo bidhi oo shah noo kari	Bidhin
6.	Wax cararay oo biidh gaday, ama if muuqda oo libdhaya	Big
7.	Shaah	Bigays
8.	Waxba	Biid
9.	Cudur bishinta hoose docdeeda kore ku dhaca	Biijo
10.	Ka wardoonid meel ama howl halis ka imaan krto	Biimo

2. Waxqabadka 5aad		
No:	Joog utaxa 1aad	Joog utaxa 2aad
1.	Is xasuustaa	Is xabaala
2.	Gacalkaa gacalkiis	Kuma jebiyo
3.	Jid ma qalloocna	Ee jidiin baa qalloocan
4.	Jir jimicsadaa	Caafimaad ku jiraa
5.	Jinni ninkii	Keenaa baxsha
6.	Jir bukaa	Jiriid kama qoslo
7.	Jir qalaad	Waa dhul qalaad
8.	Jirkii la haye	Jeelkii leh
9.	Ka daroo	Dibi dhal

3. Waxqabadka 7aad		
1.	Dhamac	Gamaar
2.	Madag	Taraq
3.	Shid	Seexi
4.	Daar	Dami
5.	Olol	Dambaaburo
6.	Jarmaado	Carraabo
7.	Xagaa	Diraac
8.	Halbowle	Haniye
9.	Min yaro	Minweyn
10.	kisi	Dhaban

4. Waxqabadka 8aad

1.	Qalaad	Cida orgigamarka uu riyaha orgeynayo
2.	Duud	Biyo yar oo meel biyood salkiisa ku jira
3.	Gooso	Arin fulinteed go,aansasho / Cid baxsasho / wax wax ka jarasho
4.	Gelin	Maalinta ama habeenka barteeda hore ama danbe
5.	Shinni	Xasharaad Malabka sameeya
6.	Abuur	Miro loogu talagalay in wax lagu beero / wax aan horay ujirin uumis
7.	Alkun	Nin ay gabar u doonan tahay
8.	Aroor	Waqtiga udhaxeeya marka waagu dilaaco ilaa marka qoraxda soo baxdo / nafley biyo doonasho
9.	Aslan	Halka wax ay ka soo unkumaan / isir
10.	Baad	Caws, Calen, Xaab i.w.m oo ay xoolouhu daaqaan

5. Waxqabadka 9aad

No:	Ereyga doolka ah	Ereyga asalka ah
1.	Marawaaxad	Babbis
2.	Barakeysi	Barkhadeysi
3.	Nimco	Barwaaqo
4.	Duco	Baryo
5.	Dayac	Baylah
6.	Jiho / Jaho	Bayni

1. Waa maxay Garwaaqsiin?

Jwb: Garwaaqsiintu waa qaab qoraal lagu qanciyo qofka sida waxa aad dooneyso looga gungaaro..

2. Waa maxay Qormada Garwaaqsiintu?

Jwb: Qormada Garwaaqsiin waa xirfad qoraal oo aad ku soo bandhigeysa awooddaada qoraalka, aftahnimadaada iyo adeegsiga afkaaga hooyo .

3. Waa maxay Doodda Garwaaqsiintu?

Jwb: Doodda Garwaaqsiin waa tababar iyo layli aad noloshaada ku horumarineysa. Waa dululaati qofku ku soo bandhigo kartidiisa iyo aqoontiisa.

4. Maxay ka tarjumeysaa Garwaaqsiintu?

Jwb: Doodda Garwaaqsiin waxay ka tarjumeysaa sidii aad u marin lahayd qofka aragtidaada in uu kula qaato oo aad ka dhaadhiciso.

5. Maxee yeelan kartaa Garwaaqsiintu?

Jwb: Doodda Garwaaqsiin waxa ay yeelan kartaa qaabab kala duwan tusaale ahaan Waxaa dhici karta in aad garwaaqsiintaada uqoreysa qof xiriir idinka dhaxeeyo sida saaxiibtinimo i.w.m

6. Waxqabadka 4aad

1.	Hadal udiidid ama af xiris ama af ka toob	Afjig
2.	Laga hadal badiyay ama laga cod karsan yahay ama laga dood badiyay	Afmiinshaar
3.	Yaab iyo amakaag ama wax laga argagoxo	Afkalaqaad
4.	Afkalahayn isla yaab ama cajiib	Afkalahayn
5.	Qofka dadka afka ka habaara ee la hela	Afkuleeble
6.	Wax af wareegsan leh sida weelka	Afmeer
7.	Magac loo yaqaan neefka dhiciska ah geela	Afkuxuuble
8.	Adyad ama cay ama maagis	Aflagaado
9.	Qofka war abuuraha ee afkiisa ku shaqeysta	Afjuxuun

7. Waxqabadka 5aad

No:	Joog utaxa 1aad	Joog utaxa 2aad
1.	Il adag arookeey	Ka boodaa
2.	Iimaan waa	Uur muggii
3.	Iimaan allah	Uur buuxsha
4.	Caruur la,aan	Waa caymo la,aan
5.	Jiid aan ku jiidee	Waa gacmo daalis
6.	Ilin la qubay	Indha buuxshaan
7.	Ilma adeer isma	Ka xariirtaa

8. Waxqabadka 7aad

1.	Dariishad	Irrid
2.	Lug	Gacan
3.	Sal	Baar
4.	Wadajir	Kalatag
5.	Dhab	Dhayal
6.	Dil	Daa
7.	Dad	Dugaag
8.	Doog	Abaar
9.	Wehel	Cadow
10.	Wadeey	Nacab

9. Waxqabadka 8aad

1.	Aglool	Guri dhisid
2.	Aqool	Dad badan cuta uqaybin / Maamulid
3.	Arar	Gogol dhiga loo sameeyo hadal ama qoraal
4.	Aroor	Nafley biyo udoonasho
5.	Asal	Halka ay wax kasoo unkumaan
6.	Asiili	Dugsiga caruurta yar yar ee aadaabta lagu baro
7.	Asqo	Wax haraad dareensan oo biyo ubaahan
8.	Awlal	Isku jirka malabka iyo xabagta shinnida
9.	Ay	Meel cidla ah oo la dagan yahay
10.	Arxan	Dad xigtanimo ka dhaxeysa / cid dhibaataysan waxtar weyn ugalid